**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Baarlamanka Fedaalka Soomaaliya**
**G0laha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kal.3-aad**
**Documenenti kal-3-aad kul.18-aad 22.10.2013**

**Kal.3-aad**
**Kul.18-aad sac.fur.11:01gh,Sac.xir. 1:oogd.**
**Guntinta :152**

**Ajendaga**
1. **Furitaanka Aayaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Codeynta warbixinta Guddiga Xeer-Hoosaadka**
4. **Akhrinta 2-aad Heshiiskii Favouri**

**Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,**

waxaana shirka Fuary Guddoomiyaha Baarlamanka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka ,uuna akhriyey Xil. Sheekh Shaacir.

Kadib, Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Wasaaradda Maaliyadda loo kordhiyo waqtiga loo keenilahaa Miisaaniyadda ,loogana dhigo waqtiga keenista Miisaaniyadda 16 november 2013.Xildhibaanadana Gacantaag ayey ku ansixiyeen.
Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in Dastuurka ay ku qorantahay Xildhibaankii 2-Kalfadhi ka maqanaado uu waynayo Xilkiisa Xildhibaann-imo.

**Xil.Cabdi Dhuxulow** –wuxuu sheegay in ku dhaqanka Xeer-Hoosaadkii hore lagu dhaqmo .Wuxuu soo jeediyey markii Codyn la gelaayo Xildhibaankii soo xaadira haddana iska taga Fasax la'aan Booskiisa Wuxuu noqonayaa Haa(Yes)
Xil.Jaamaal(point of order) wuxuu sheegay in Xildhibaanku saranyahay Xil Qaran.loona baahanyahay in uusan ka tegin shaqada mar haddii uu yimaado .

**Xil. Sahra Qoorsheel**(Point of order)waxay sheegtay in xeer-hoosaadka la ixtiraamo .
Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la gelaayo Agendihii 2-aad Codeyntiisa oo tilmaamayo Qod.28-aad ee Dastuurka Codeyntana ay noqoneyso 50+1.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xoghay'nta Guddiga Anshaxa , Mudane Maxamed Cumar <acloow.si uu u akhriyo Qodobadda la ansaxiyey.

1. **Jawalka waqtiga iyofasaxyada**
   Codeyntana waxay u dhacdey sida tan:

   **144 Xil**. Way Ogolaadeyn
   **15 Xil.** Way Diideyn
   **9 Xil.** Way ka aamuseyn

2. **Qodobka Awoodaha Golaha Shacabka Baarlamanka Federaalka Soomaaliya**
   **Waxaa wax ka badal lagu sameeyay Xarafka (Q)**
   Codeynta waxay u dhacdey sida tan:

   **146 Xil.** Way ogolaadeyn
   **11 Xil.** Way diideyn
   **8 Xil.** Way ka Aamuseyn

3. **Qod. 6-aad Guddoonka iyo Xafiiska Golaha ,waxaa wax ka debela lagu sameeyey Farq. 2-aad ee Qodobkaan .**

   Kadib,Codeynta loo qaadey waxay u dhacdey sida tan ,Inta ogolaatey Nadaamka Danbe.

   **Xil.** Way Ogolaadeyn
   **114 Xil**. Way Diideyn
   **10 Xil.** Way ka Aamuseyn
   Guddoonka wuxuu sheegay in ay san Gudbin Codeyntaan

4. **Qod. 7-aad Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxaa lagu daray Farqado Cusub oo 3 ah,**
   waxaana loo qaadey Cod wuxuuna u dhacay sidatan:
   **71.Xil**. Way Ogolaadeyn
   **99.Xil**. Way Diideyn
   **19.Xil.** Way ka aamuseyn
   Guddoomiyaha wuxuu sheegay in aysan Gudbin Seddexdaan Farqadood.

5. **Qodobka 9-aad Xilwaayidda Guddoomiyaha iyo 2diisa K/Xigeen,waxaa wax ka bedel lagu sameeyey Farqadda 2-aad islamarkaana waxaa laga saarey Xarafka (D).**

   Codeyntana waxay u dhacdey sida tan:

   **13. Xil** Way ogolaadeyn

   **145. Xil.** Way diideyn

   **7. Xil.** Way kaaamuseyn

   Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Qodobkaan uusan Gudbin.

6. **Qodobka 12-aad Guddiga joogtada ah ee Golaha,waxaa wax ka badal lagu sameeyay Farqada 3-aad Xarafka (a,c)xarafka(j)gabi-ahaanba waa laga saaray xarafka [H] waxaa lagu wareejiyay Qodobka 7-aad.**

   Codeynta la qaaday waxay u dhacday sida tan:

**A)**

**14 Xil.** Wey ogolaadeyn

**125 Xil**. Wey diiday

**4 Xil.** Wey ka aamuseyn

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uusan gudbin Qodobkaan

**B)**

**142 Xil.** Wey ogolaadeyn

**13 Xil.** Wey diideyn

**10 Xil.** Wey ka aamuseyn

Guddoomiyaha wuxuu sheegay inuu qodobkaan uu yahay ansax.

Kadib guddoomiyaha wuxuu sheegay inuu barito uu jiro shirka lana imaado **10:**subaxnimo si codeynta hartay loo dhameystiro

**Shir-Guddoomiyaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaaji waxaa uu sheegay inuu shirka xiran yahay saacaddu markey ahayd 01:00gd.**